# Istaraatiijiyadda koroonaha ee mustaqbalka fog ee nolol maalmeedka caadiga looga dhigayo

Safmarkii weji kale ayuu hadda u gudbay, laakiin weli waxaan ku khasbannahay in aan la noolaanno fayraska koroonaha. Waxay dawladdu diyaarisay istaraatiijiyad iyo qorshe heegan oo safmarka lagu maaraynayo, si dhow ayayna xaaladda ula socotaa. Shuruudaha ugu muhiimsan ee mustaqbalka lagula noolaanayo covid-19 ayaa waxay yihiin in si dhow loola socdo, qorshayaal wanaagsan la sameeyo iyo tallaalis.

Hadafka maaraynta ayaa ah in la badbaadiyo nafta iyo caafimaadka dadka, ayada oo islamarkaana bulshadu furan tahay – dhaqaaluhuna ilaa inta suurtaggalka ah caadi u shaqaynayo. Si loo ogaado oo wax looga qabto xaaladaha kala duwan ee mustaqbalka dhici kara, waa in ay jiraan la-socosho wanaagsan, awood iyo heegan.

–Maalmihii caadiga ahaa ayaan dib u soo ceshannay. Waxaan hadda caadigii ku soo celinaynaa sida aan ula dhaqanno oo u maarayno covid-19. Taas oo ka dhigan in aysan dawladdu hadda kaddib caadi ahaan go'aamin doonin tillaabooyinka ka hortagga cudurrada, ee ay Machadka Caafimaadka Dadweynaha (FHI) iyo degmooyinku hadda laga billaabo mas'uul ka ahaan doonaan bixinta talooyinka ka hortagga cudurrada, ayay tiri wasiirka caafimaadka- iyo daryeelka Ingvild Kjerkol.

## Heeganka bulshada

Qorshaha dawladda ee sii maaraynta cudurka safmarka ah ee covid-19 ayaa bulshada u sahlaysa in si dhakhso leh wax looga qabto haddii la-socoshada iyo qiimaynta khatartu ay muujiyaan in safmarku dad aad u badan ku dhici karo ama

uu culays badan ku keeni karo adeegyada caafimaadka. Qorshaha heeganku wuxuu soconayaa ilaa iyo bisha juun ee 2023-ka.

Maaraynta xaaladdu waa in ay ahaataa mid ku salaysan toosna loogu beegayo xaaladda kala qaadista cudurka, khatarta iyo waxyeellada bulshada soo gaaraysa. Go'aammada waxaa lagu salaynayaa qiimayn guud oo ay ka mid tahay qiimaynta dhaqaalaha bulshada.
–Waa in maarayntu si guud ugu salaysnaataa caafimaadka dadweynaha- iyo bulshada, ee aanay ahayn mid ku kooban covid-19 oo keliya. Si maarayntu u shaqayso waxaa muhiim ah in la helo la-socosho wanaagsan, aqoontii ugu danbaysay iyo heegan wanaagsan, ayay tiri Kjerkol.
Waa in dhammaan qaybaha kala duwan ee bulshadu leeyihiin heegan ay sida ugu dhakhsaha badan ee suuraggalka ah ku abaabuli karaan kuna fulin karaan tillaabooyinka loo baahan yahay ee habboon. Qaybaha bulshadu waa in ay qorshayaashooda iyo baahida heeganka waafajiyaan istaraatiijiyadda dawladda.

## Kurjado tillaabooyin ah oo heeganka qayb ka ah

Waxay dawladdu samaysay kurjado tillaabooyin ah oo la socda tillaabooyinka ka hortagga cudurrada ee heer qaran kuwaas oo noqon kara xeerarka guud ee la raacayo haddii ay dhacdo in cudurku dillaaco ama ay soo baxaan noocyo cusub oo fayraska ah. Soo gelidda waddanka ayaa iyana loo sameeyay kurjado tillaabooyin ah oo kuwaas la mid ah.

–Habka safmarka loo maaraynayo si uu u noqdo mid fudud oo la sii saadaalin karo ayay waxay dawladdu diyaarisay kurjado tillaabooyin ah oo la socda tillaabooyinka ka hortagga cudurrada kuwaas oo qayb ka ah qorshaha heeganka. Kurjadaha tillaabooyinku waxay sahlayaan qorshaynta, ka-wadahadalka iyo wax-ka-beddelista tillaabooyinka, ayay tiri Kjerkol.
Tillaabada ka hor intaan la soo rogin waa in gaarkeeda qiimeyn loogu sameeyo ayada oo loo eegayo xaaladda markaas taagan iyo aqoonta ugu danbeysa ee la hayo. Dhammaan wasaaradaha iyo waaxaha hoos yimaada waa in ay, ayaga oo ku salaynaya kurjadaha tillaabooyinka, cusbooneysiiyaan qorshayaashooda heeganka oo u diyaargaroobaan in cudur dillaaco iyo noocyo cusub oo fayraska ah.

## TISK

Tijaaba-qaad, gooni-u-bixid, raadraaca cudurka iyo karantiilka (TISK) ayaa udubdhexaad u ahaa istaraatiijiyaddii koroonaha- iyo maarayntiisa ee dawladda. Tillaabooyinka TISK waa qayb ka mid ah qorshaha heeganka, haddii loo baahdana si degdeg ah ayaa mar kale loo soo celin karaa. Waxaa degmooyinka laga codsaday in ay ilaa iyo hadda sii lahaadaan heegan ay toddobaadkiiba tijaabo PCR ah uga qaadi karaan dadweynaha boqolkiiba hal. Waxaa sidoo kale degmooyinka laga codsaday in ay diyaariyaan qorshayaal ay awooddooda ku kordhinayaan ayaga oo wax ka beddelaya qaabka ay shaqaalahooda u isticmaalayaan. Sidoo kale, waa in degmooyinku dejiyaan qorshayaal ay laba toddobaad gudahood ku diyaarinayaan nidaamka raadraaca cudurrada. Taas oo suurageli karta haddii ay sii haystaan telefoonnada iyo kombiyuutarrada arrintaas lagama maarmaanka u ah.

–Degmooyinka waa loo soo celinayaa kharashka dheeriga ah ee uga baxa heeganka sare loo qaadayo. Miisaaniyadda qaranka ee cusub ayay dawladdu ku soo gudbin doontaa qiimayn cusub oo lagu sameeyay heerka heeganka iyo magdhawga, ayay tiri Kjerkol.
Dad aad u badan ayaa tallaalan, dad badanna infakshanka ayaa ku dhacay. Taas oo ka dhigan in ay dadweynaha badankoodu ka difaacan yihiin in ay cudurka aad ugu xanuunsadaan, sidaas darteed na aad looguma baahna tillaabo lagu xaddidayo kala qaadista cudurka. Waa la joojinayaa taladii gaarka ahayd ee sheegaysay in 4 maalin guriga la joogo kaddib marka uu qofka koroone ku dhaco. Machadka Caafimaadka Dadweynaha ayaa hadda kaddib loo daynayaa talooyinka cilmiga ku dhisan.

## Tallaalista

Tallaalku waa aaladda ugu muhiimsan ee ka hortagga cudurka safmarka ah. Barnaamijka tallaalka koroonaha wuxuu sii soconayaa ilaa iyo bisha juun ee 2023-ka. Istaraatiijiyadda tallaalku waxay sii ahaanaysaa mid is-beddelaysa, kuna salaysan aqoonta ugu danbaysa ee cudurka loo leeyahay iyo is-beddelka safmarka. Waa in degmooyinku hayaan deeq diyaar ah, si qof walba oo doonayo u helo fursad uu tallaalista ku billawdo ama ku dhammaystirto.

FHI ayaa si joogto ah u qiimaynaysa baahida loo qabo cirbad afraad. Waxaa laga yaabaa in ay FHI kula taliso dadka kuwooda ugu da'da weyn iyo kuwa halista ku

jiro haddii uu cudurku ku dhoco in ay qaataan cirbad xoojin ah inta aan la gaarin xilliga qaboobaha ee 2022/2023. Sidaas darteed waa in degmooyinku lahaadaan qorshayaal si degdeg ah loogu kordhin karo awoodda tallaalista, ayay tiri wasiirka caafimaadka- iyo daryeelka Ingvild Kjerkol.
Ayada oo u maraysa heshiiska Midowga Yurub (EU) ayay dawladdu tallaalo ka dalbatay Pfizer-BioNTech iyo Moderna, kuwaas oo ay ku jiraan tallaallo loogu talo galay nooca omikoroonka. Lama oga goorta kuwaan la soo saari doono, iyo in ay ka fiicnaan doonaan kuwa hadda la isticmaalo.

## Shahaadada koroonaha

Shahaadada koroonaha hadda lagama isticmaalo Norway, laakiin waxaa jira waddammo weli laga isticmaalo. Waa in aan ku tala galnaa in ay is-beddeli karto xaaladda kala qaadista cudurka, taas oo keeni karta in tillaabooyin ka-hortag cudur oo intan ka adag lagu soo rogo waddanka dhexdiisa iyo soo gelidda Norway labadaba. Sidaas darteed waxay dawladdu ka shaqaynaysaa in la sii wado xeerarkii sharciga ka-hortagga cudurka ee ku-meelgaarka ahaa ee ku saabsanaa shahaadada koroonaha.

## Wareejin awoodeed

28-kii bishii maarso ayay Wasaaradda Caafimaadka- iyo Daryeelku dib ula noqotay awooddii Agaasinka Caafimaadka loo siiyay isu duwidda dadaallada laamaha caafimaadka markii uu cudurka covid-19 dillaacay. Waxaa awooddaas la siiyay 31-kii jannaayo 2020-kii. Is-beddelka cudurka safmarka ah ee covid-19 ayaa ah mid aan tilmaamayn in loo baahan yahay in awoodda la wareejiyo.